

DOWLAD GOBOLEEDKA GALMUDUG

Dastuurka Ku-meel-gaarka

La Ansixiyay May 5, 2018

Dhuusamareeb, Galmudug, Soomaaliya

DASTUURKA KMG EE DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG SOOMAALIYA

EE GOLAHA XEER-DEJINTU ANSIXIYAY SHANTII BISHA SHANAAD SANADKA LABA KUN SIDDEED IYO TOBAN

DASTUURKA KMG EE DOWLAD GOBALEEDKA GALMUDUG (DGGM)

ARAR

Ayadoo la raacayo Heshiiskii Mideynta Maamullada Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM) iyo Dowlad Goboleedka Gobollada Dhexe (DGGD) ee ku taariikheysan 6dii Disember 2017 ayaa waxaa lagu heshiiyay sameynta Dastuur iyo maamul mideysan oo magaciisu yahay Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM). Dastuurkaas oo ay saldhig u yihiin Shareecada Islaamka, Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), dhaqanka suuban, nidaam caddaaladeed, nabad, tala-wadaag, dimuqraadiyad iyo hanaanka xisbiyada badan.

Haddaba Dastuurka ku-meel-gaarka (KMG) ee DGGM waa Xeerka ugu sarreeya Xeerarka DGGM sida ku cad mabaadi’da Dastuurka iyo qaab-dhismeedka nidaamka Dowladda iyo awaamirta uu tilmaamayo, waxuuna ku dhisan yahay mabda'a qaybinta awoodda ee hay'adaha Xeer-dajinta, Fulinta iyo Garsoorka, aaya-ka-talinta, ismaamulka iyo sarreynta Xeerka si loo xaqiijiyo rabitaanka shacabka DGGM loona gaaro horumar iyo caddaalad bulsho.

Cutubka Kowaad

Mabaadi'da Guud

QODOBKA 1AAD

Mabaadi'da Guud ee Aasaasiga ah

1) Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM) waa dowlad-goboleed ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya "JFS".
2) Bulshada Galmudug waa Muslim Sunni ah, kuna dhaqanta mad-habka Shaaficiyada, lagumana faafin karo mad-hab kale iyo caqiido aan aheyn caqiidada Ashcariya.
3) Dastuurka Dowlad Goboleedka Galmudug waxaa saldhig u ah Shareecada Islaamka iyo Dastuurka JFS, wixii ka hor imaanayana waa waxba kama jiraan.
4) Dowlad Goboleedka Galmudug, waxa ay ku dhisantahay rabitaanka shacabka Galmudug.
5) Awoodda maamulka DGGM waxaa leh dadweynaha Galmudug, waxa ayna u wakiilanayaan xubno ay ku soo doorteen hannaanka dimuqraadiga xisbiyada badan si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka doorashooyinka DGGM.
6) Ma jiri karo qof, koox ama qayb ka mid ah bulshada oo awoodda dowladnimo u adeegsan kara si gaar ah.

Qodobka 2aad.

Dawladda iyo Diinta

1) Islaamku waa Diinta DGGM.
2) Diin aan ahayn tan Islaamka, mad-habkeeda Shaaficiyada (Ashcariya) laguma faafin karo DGGM.
3) Lama soo saari karo xeer aan waafaqsaneyn Mabaadi'da Guud ee Shareecada Islaamka iyo Maqaasiddeeda.

Qodobka 3aad

Dhulka Dowlad Goboleedka Galmudug

1) Gayiga DGGM waxa uu ka koobmaa berriga, badaha, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi-qaaradeedka ee Dawlad Goboleedka Galmudug.
2) DGGM waxa ay dib-u-eegis iyo qiimeyn ku sameyneysaa deegaannada Galmudug si waafaqsan Dastuurka JFS, waxaana la sameynayaa nidaam Xeer oo lagu dhisayo Gobollo, Degmooyin iyo xuduudahooda.
3) Dhismaha Gobollada iyo Degmooyinka cusub waxaa soo jeedinaya Xukuumadda DGGM waxaana ansaxinaya Golaha Xeer-dejinta DGGM.
4) Soohdimaha dhul ee DGGM waa: Waqooyi waxaa ka xiga Dowlad Goboleedka Puntland, Bari waxaa ka xiga Badweynta Hindiya, Galbeed waxaa ka xiga dalka Itoobiya, Koonfur waxaa ka xiga Dowlad Goboleedka Hirshabeelle.
5) Xuduudaha Gobollada waxaa si-kumeel-gaar ah loogu dhaqmayaa xuduudihii Gobollada Dalka Jamhuuriyadda Soomaaliya, sida ku cad soohdimaha xuduudihii jiray dowladdii dhexe ee Soomaaliya ka hor 1991 ay ku kala calaamadeysay Gobolada Jamhuuriyadda Soomaaliya sida ku qeexan Qodobka 49aad, Faqrada 5aad ee DJFS.
6) Khilaafaadka xuduudaha, waxa lagu xalinayaa talo-soo-jeedinta Gudiga Madaxabanaan ee Xuduudaha iyo Federaalka JFS sida ku cad Dastuurka JFS Qodobiisa 111aad, Faqradiisa 5aad.
7) DGGM waxa ay soo dhaweyneysaa Gobol kasta ama deegaan ay deganyihiin bulsho cayiman aqlabiyadda shacabkeeduna ay doonayaan in ay la midoobaan DGGM si ku dhisan is afgarad iyo heshiis aan wax loogu dhimeynin Dowlad Goboleed kale islamarkaana ka hor imaanaynin Dastuurka JFS Qodobkiisa 49aad, Faqradiisa 6aad.

Qodobka 4aad

Astaanta iyo Calanka Dowlad Goboleedka Galmudug

1) Astaanta u gaarka ah DGGM waa mida ku qeexan lifaaqa (A).

2) Calanka DGGM waa midka ku qeexan lifaaqa (A).

Qodobka 5aad

Magaalo-madaxda iyo Xaruunta DGGM.

1) Magaalo-madaxda Dowlad Goboleedka Galmudug waa Dhuusa-mareeb.
2) Magaalo-madaxda DGGM waxa ay yeelaneysaa nidaam gaar ah oo lagu dhaqo waxaana xeer ka soo saarayo Golaha Xeer-dajinta Galmudug.

Qodobka 6-aad.

Afka.

1) Afka rasmiga ah ee DGGM waa Af-Soomaali.
2) Afka labaad ee DGGM waa Af-carabi.

Qodobka 7aad

Mabaadi'da Aasaasiga ah.

1) Dowlad Goboleedka Galmudug waxa uu ku saleysanyahay hannaan iyo nidaam dimoqoraadiyadeed, kuna dhisan matalaadda dadweynaha, awoodda oo dhan waxaa leh shacabka, waana hannaan ku saleysan nidaamka axsaabta badan iyo caddaalad bulshadeed loo wada dhanyahay.
2) DGGM waxa uu hirgelineyaa mabaadii'da qaybinta awoodda; waxaa jiraya saddex awoodood oo siman, hadaf mideysan leh isna dheellitiraya, wadashaqeyntoodana ku dhisantahay daah-furnaansho iyo isla-xisaabtan, saddaxdaas awood oo kala ah:
    a) Awoodda Xeer-dejinta;
    b) Awoodda Fulinta;
    c) Iyo Awoodda Garsoorka.
3) DGGM waxa ay dhowreysaa xuquuqda aadanaha, sarreynta Xeerka, xeerarka caalamiga oo ay JFS aqoonsantahay, caddaalad, wadatashi siyaasadeed oo bulshadu u wada dhantahay iyo qeybinta saddaxda awoodood.

4) Haweenka waa in laga qeybgaliyaa hay'adaha dastuuriga ee DGGM.

Qodobka 8aad.

Sarreynta Xeerka.

1) Xeerka ayaa ka sarreeya qofkasta, dhammaan hay'adaha dowladda iyo mas'uuliyiinta DGGM waxay u wada hoggaansamayaan Dastuurka iyo Xeerarka JFS iyo Dastuurka iyo Xeerarka DGGM.
2) Shareecada ka sakoow Dastuurka DGGM ayaa ugu sarreeya Xeerarka DGGM, Xeer lagu baddali karo, lagu laali karo ama lagu jabin karo ma jiro; Xeer kasta oo ka hor imaanaya Dastuurka DGGM waa waxba-kama-jiraan marka laga reebo Xeerarka waafaqsan Dastuurka JFS.
3) DGGM waxa ay sameyneysaa Xeerar laga hirgaliyo deegaannadeeda oo u gaar ah DGGM, Xeerarkaas oo aan ka horimaankarin Xeerarka JFS.

Qodobka 9-aad.

Maalmaha Fasaxa.

1) Xafladda Mowliidka Nabigeena Muxamed NNKH (12 Rabiicul Awal).
2) Maalinta Jimcaha
3) 26 Juun
4) Kowda Luuliyo
5) Ciida Soon-fur (Hal maalin).
6) Ciida Carafo (Saddex maalin).
7) Maalinta xuska Shuhadada (17 Ramadan).

Cutubka Labaad.

Xuquuqda iyo Xorriyaadka Aasaasiga ah.

Qodobka 10aad.

Dhaqangelinta Qawaaniinta Caalamiga ah.

DGGM waxay dhowreysaa Baaqa Caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha iyo Xeerarka caalamiga ah ee guud ahaan la aqoonsanyahay iyo Qodobada Cutubka Labaad ee Dastuurka JFS uu ku xusayo xuquuqda iyo xorriyadaha

aasaasiga ah DGGM, waxa ay dhaqangalin siineysaa Xeerarka iyo axdiyada caalamiga ee Baarlamaanka Soomaaliyana meelmariyay.

Qodobka 11aad.

Xaqa Nolosha.

1) Nafta aadanuhu waa deeq llaahay, waana qaali; qof kastaana wuxuu xaq u leeyahay noloshiisa, wuxuuna ku waayi karaa oo keliya marka maxkamad horteed uu ku caddaado dembi ay ciqaabtiisu tahay dil.
2) Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay in Ia xurmeeyo sharaftiisa, sumcadiisa iyo noloshiisa gaar ahaaneed.

Qodobka 12aad.

Xaqa Xoriyadda iyo Nabad-galinta.

1) Qofkastaa waa xor, waxa uuna xaq u leeyahay madaxbannaanida xorriyaddiisa shaqsiga ah, qofna lama adoonsan karo, lamana lahaan karo, lagumana shaqeysan karo si Xeerarka aan waafaqsanayn.
2) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay xoriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabad-galyada qofnimadiisa.
3) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo amni uu ku noolaado iyo nabadgalinta qofnimadiisa iyo kaamil-ahaanshaha jirkiisa, waxaana reeban jirdil iyo ciqaab xaasidnimo.
4) Barnaamijyada lagu ciribtirayo dhaqamada xunxun ee soo jireenka ah sida gudniinka Fircooniga ee gabdhaha waa waajib saran maamulka DGGM.
5) Soo tuuridda ilmaha uurka ku jira waa ay reebantahay, marka laga reebo xaalad caafimaad oo uu xaqiijiyay dhaqtar takhasus u leh laguna badbaadinayo nolosha hooyada.

Qodobka 13aad.

Xurmada Hoyga.

1) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu helo hoy u gaar ah iyo xurmada hoygiisa.

2) Qofna hoygiisa ama meeshii kale ee isaga u gaar ah laguma xadgudbi karo, lamana baari karo, haddii aan amar cad oo sababaysan laga wadan maxkamadda awooda u leh soo saaridda amarka ee heer DGGM ama heer JFS. Waxaase intaas ka baxsan haddii ay ciidamada amniga u sugnaato inaan laga fursan karin in si deg-deg ah loo galo hoy si looga hortago khatar culus oo ku soo wajahan bulshada.
3) Waxaa waajib ah in amarka Maxkamadda si toos ah loogu akhriyo degganaha hoyga.
4) Qofkastaa waxa uu xaq u leeyahay arimihiisa gaarka u ah in aan lagu faragalin wixii aan ka horimaaneyn Shareecada Islaamka, xeerarka dalka iyo dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed.

Qodobka 14aad.

Xaqa Sinnaanta iyo Caddaaladda

1) Muwaadiniinta DGGM waa ay simanyihiin iyadoon loo eegin jinsi (lab iyo dhedig), isir, abtirsiimo, midab, luuqad, muuqaal, fikir siyaasad iyo xaalad gaara oo qof ama bulsho ku sugantahay si waafaqsan Shareecada Islaamka.
2) Shacabka DGGM, waa shacab siman, si simanna ugu wada noolaanaya dhulka iyo nidaamka DGGM, uguna faa'iideeysanaya kheyraadka dhulka si siman oo waafaqsan Xeerarka DGGM iyo JFS.
3) Shacabka DGGM waxay xaq u leeyihiin inay helaan cadaalad ay u siman yihiin, garsoor caadil ah.
4) Shisheeyaha DGGM ku jooga si waafaqsan Xeerarka dalka waxay leeyihiin xuquuq iyo waajibaad la siman tan muwaadiniinta marka laga reebo xuquuqda siyaasadda ee muwaadiniinta u gaarka ah.
5) Waa fal takoorid ah haddii natiijadiisu noqoto is-hortaag ama ciriirigelin xaqa qofka, xataa haddii falka si ulakac ah aan loo samayn.
6) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada Xukuumadda sida Xeerar, hab siyaasadeed iyo hab maamul ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-u-dhacsan.

7) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aammada ka soo fula maamullada ay ahaadaan kuwo ku dhisan Xeer, maangal ah, go'aan-ka-gaaristoodana loo maray hannaan caaddaalad ah.

Qodobka 15aad.

Xaqa Waxbarashada.

1) Muwaadiniinta DGGM waxay xaq u leeyihiin in ay helaan waxbarasho tayo leh ayadoo dugsiyada Hoose/Dhexe iyo Sare ay lacag la'aan yihiin taas oo mar walba ku xiran heerka awoodda maamulka.
2) DGGM waxuu mudnaan gaar ah siinayaa horumarinta, ballaarinta iyo faafinta tacliinta iyo cilmi-baarista, hal-abuurka iyo farshaxanka, ciyaaraha hiddaha & dhaqanka suuban, iyo isboortiga ee dadka deggan DGGM.
3) Waxbarashadu waa inay noqoto mid u danaynaysa dadweynaha, kuna habaysan waayaha iyo deegaanka gaar ahaaneed ee bulshada.
4) Waxaa qasab ah in la baro diinta Islaamka carruurta dugsiyada Dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.
5) Waa in lagu dhisaa dugsiyada gaarka ah, machadyada iyo jaamacadaha si waafaqsan manhaj mideysan oo ay leedahay DGGM, saldhiggiisuna yahay Madhabta Shaaficiyada (Ashcariya).
6) Ciribtirka akhris-qoris la'aanta iyo waxbarashada dadka waaweyni waa waajib saaran maamulka DGGM.
7) DGGM waa in ay horumarisaa hiddaha iyo dhaqanka suubban ee Shacabka DGGM, iyadoo ku dadaaleysa in ay bulshada ka suuliso caadooyinka haraaga ah iyo kuwa dhowaan-soo-baxa ah ee wax u dhimaya midnimada, ilbaxnimada iyo caafimaadka bulshada.
8) Waxaa ka reeban in lagu dhigo ama lagu faafiyo dugsiyada waxbarashada fikirka argagixisada oo ku saleysan qeybinta towxiidka IWM.
9) DGGM waa in ay ururisaa, ilaalisaa, kaydisaa waxyaabaha iyo xarumaha taariikhiga ah ee DGGM, iyadoo horumarinaysa aqoonta iyo farsamada xilkaas lagu gudan karo.

Qodobka 16aad.

Xaqa Shaqada.

1) Qof kastaa waxuu xaq u leeyahay in uu shaqeeyo iyo mushaar u dhigma, islamarkaana wax u dhimeynin sharaftiisa.
2) Qof kasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu sameeyo, kuna biiro urur shaqaale kana qaybgalo hawlaha ururkaas.
3) Qof kasta oo shaqaale ah waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo ama ka qeyb qaato banaanbax si nabad ah.
4) Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay inuu sameeyo shaqo-joojin.
5) Urur shaqaale, ama loo-shaqeeyayaasha waxay xaq u leeyihiin inay galaan gorgortan-wadareed ee ku saabsan arrimaha shaqada.
6) Dhammaan shaqaalaha, gaar ahaan haweenku waxa ay yeelanayaan xuquuq gaar ah oo lagu dhowrayo sharaftooda si aan loogu sameyn ku xadgudub jinsiyadeed gudashada waajibaadkooda shaqo.
7) Waxaa reebban falkasta oo shaqo joojin qorshaysan ah, laguna cuuryaaminayo dhaqaalaha DGGM, keeni karana rabshado siyaasadeed.
8) Xaqa shaqo joojinta waxaa loo adeegsan kara sida u xadiday xeerka shaqada iyo shaqaalaha.
9) Lama Shaqaaleyn karo qof burcad-badeed ah ama argagixisa ah ama aaminsan fikirka argagixisada iyo mid la soo shaqeeyay.
10) DGGM waxa ay soo saareysaa Xeerka shaqada iyo shaqaalaha, kaasoo aan ka horimaaneynin Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerka shaqada iyo shaqaalaha JFS.

Qodobka 17aad.

Xaqa Caafimaadka.

1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay biyo nadiif ah uu cabo.
2) Muwaadiniinta DGGM waxa ay xaq u leeyihiin in ay helaan adeeg caafimaad oo tayo leh iyo in loo fidiyo adeeg caafimaad xilliyada xaaladaha deg-dega ah iyo adeeg caafimaad gaar ah oo loo fidinayo dadka naafada iyo kuwa saboolka ah.

3) DGGM markay fulinayso siyaasadda daryeelka caafimaadka guud, waxaa xil ka saaranyahay ka-hortagga cudurrada faafa, helitaanka daaweyn lacag Ia'aan ah, fayo-dhawrka guud iyo biyo nadiif ah oo la cabikaro.
4) DGGM waxay oggoshahay furashada adeegga caafimaad ee gaarka ah waxayna soo saareysaa xeer ay ku nidaamineyso.

Qodobka 18aad.

Xaqa Daryeelka Qoyska, Haweenka iyo Caruurta.

1) Xannaanada hooyada iyo caruurtu waa waajib saaran DGGM ayadoo waalidka uu saaran yahay daryeelka, bar-baarinta suubban iyo waxbaridda caruurtooda.
2) Qofka qaangaarka ah waxaa waajib ka saaranyahay xannaaneynta waalidkiis haddii waalidku isku filnayn xag sababo caafimaad, dhaqaale ama gabow.
3) DGGM waxuu ilaalinayaa, dhiirigelinayaa guurka.
4) Caruur waxaa loola jeedaa qofka da’diisu ka yar tahay shan iyo toban (15) sano.
5) Ilmuhu waxa uu xaq u leeyahay nolol, magac, jinsiyad, koriimo, waxbarasho iyo daryeel caafimaad.
6) Waxaa reeban shaqada wax u dhimaysa caruurta noloshooda, caqiidadooda, dhaqankooda, koriimadooda iyo waxbarashadooda.
7) Qoysku waxa uu ku dhismaa lab iyo dheddig ku heshiiya guur si waafaqsan Shareecada Islaamaka.
8) Guurku ansax ma noqonayo haddii aaney labada dhinac midkood uusan gaarin da’ada guurka si waafaqsan Shareecada Islaamka.
9) Caruurta waa in loola dhaqmaa si waafaqsan Qodobka 29aad ee Dastuurka JFS, marka laga reebo Faqraddiisa Sideedaad (8).
10) DGGM waxay daryeelaysaa maatada, agoonta, geesiyiintii shuhadada u soo halgamay, kuna naafoobay difaaca dalka iyo diinta, iyo kuwa da’da ah.
11) DGGM waxay ku dadaalaysaa kor u qaadista daryeelka iyo horumarinta reer miyiga.

12) DGGM waxay u abuuraysaa haweenka jawi wax ku ool ah sidii ay si firfircoon uga qeyb qaadan lahaayeen arrimaha dhaqaalaha, nolosha bulshada iyo siyaasaddaba.

Qodobka 19aad

Daryeelka Dadka Baahida Gaarka ah Qaba

1) DGGM waxa ay dadka baahida gaarka ah qaba siineysaa daryeel caafimaad, xannaano, waxbarasho, qalabyo casri ah, xirfado iyo fursado ay ku shaqeystaan.
2) Dowlada ayay waajib ka saaranyahay daryeelka qofkasta oo aan is-daryeelikarin, cid daryeeleysana aysan jirin.
3) Dowladu waa in ay dhiirigalisaa, samaysaana hay'ado u gargaara iyo xarumo lagu xanaaneeyo dadka ku xusan farqadaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkaan.
4) Xeer gaar ah ayaa qeexaya dadka loo aqoonsanayo inaysan is daryeelikarin iyo heerarkooda.

Qodobka 20aad.

Daryeelka Agoonta iyo Dadka ku Naafooba La-dagaallanka Argagixisada

1) DGGM waxay daryeel buuxa siinaysaa agoonta ka soo jeeda degaannada DGGM.
2) DGGM waxay si gaar ah u daryeeleysaa agoonta shuhadada naftooda u huray difaaca diinta, dadka iyo dalka.
3) Qofkasta oo ku naafoobay la dagaalanka argagixisada iyo difaaca degaanada Galmudug wuxuu xaq u leeyahay daryeelkiisa inta uu noolyahay.
4) Golaha Xeer-dejinta DGGM ayaa ka soo saaraya xeerar gaar ah oo lagu nidaaminayo daryeelka agoonta.

Qodobka 21aad.

Masuuliyadda Ciqaabta.

1) Masuuliyadda ciqaabtu waa shakhsi, qofna looma ciqaabi karo fal-dambiyeed uu geystay qof kale, waxaana reeban masuuliyad ciqaab wadareed haddii aysan jirin dambi wadareed.
2) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu ku kacay Xeerku dembi uusan u aqoon, qofna laguma xakumi karo ciqaab aan lagu tilmaamin Xeerka.

Qodobka 22aad.

Xaqa Dacwada, Eedeysanaha iyo Isdifaaca.

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad Xeerka waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh.
2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo garsoor madax-bannaan, caadil ah, aan eex lahayn, laguna qaadayo maxkamad dadweynaha u furan ama golihii kale ee awood u leh , lana galo waqti maangal ah,
3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwad, heer kasta oo ay taagan tahay.
4) DGGM waxay u damaanad-qaadaysaa difaac lacag la'aan ah shaqsiyaadka iyo bulshooyinka marka ay si Xeer ah ay ugu raadinayaan danta guud.
5) Qof kasta waa bari illaa maxkamad si kama-dambays ah ugu xukunto dambiile.
6) Qof kasta oo xoriyadiisa laga qaado lana xiro, waa in 48 (afartan iyo siddeed) saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamadda awoodda u leh qaadista dacwaddiisa, waana in sida ugu dhaqsiyaha badan loogu sheego waxa lagu soo eedeeyay.
7) Dacwad baaristeedu 60 maalin kabadan socon kartaa ma jirto, haddii eedeysanaha lagu caddeynwaayo dambiga waa in galka dacwada la xiro eedeysanahana la sii daayo, haddii hay'adaha amniga u baahdaan in ay hayaan eedeysanaha waqti mudadaas ka badan waa in ay horgeeyaan garsoore sababo maangal ah.
8) Qof kasta oo ku sugan degaanka DGGM ee aan awoodin in uu u yeerto wakiil Xeer oo difaaca, waxaa uu xaq u leeyahay in loo qabto qareen maxkamada horteeda ka difaaca.

9) Qof kasta oo xoriyadiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in lagu xiro xaruumaha laamaha amniga oo kaliya, kuna haboon nolosha aadanaha, kana helikaro biyo, cunto, hooy iyo akhbaaraad, waana in la ilaaliyaa nabadgalyadiisa iyo sharaftiisa aadaminimo.
10) Qof kasta oo xoriyaddiisa laga qaado waxa uu xaq u leeyahay in uu iska difaaco eedeymaha loo soo jeediyo iyo cadeymaha la soo hordhigo, qofna laguma qasbi karo dambi-qirasho.
11) Xabsigu waa edbin iyo anshax toosin , DGGM xilbaa ka saaran kor-u-qaadidda akhlaaqda iyo xirfad baridda maxbuuska si uu ugu noqdo bulshada isaga oo yeeshay dhaqan suubban.
12) Argagaxisada waxaa loola dhaqmayaa si ka duwan sida loola dhaqmo eedaysanayaasha kale, soo qabashadooda, baaristooda, maxkamad geyntooda iyo xabsi ku hayntooda, waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 23aad.

Xaqa Dhaq-dhaqaaqa iyo Safarada

1) Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu u safro halka uu doono, kuna soo noqdo hoygiisa marka uu doono islamar ahaantaana uu doorto in uu dago halka uu doono, sida ku xusan qodobka 21aad ee Dastuurka JFS.
2) DGGM waxa ay muwaadinkeeda u sahlaysaa inuu ka helo degaankiisa Dokuumenti Safar oo ka soo baxay Xaafiiska JFS u qaabilsan soo saarista dokumentigaas.

Qodobka 24aad.

Xorriyada Cabbiraadda Fikirka, Hadalka iyo Hal-abuurka

1) Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho, doono, helo, gudbiyo, soona bandhigo ra'yigiisa, xog ama afkaar si kastaba, isagoon ku xadgudbin anshaxa iyo amniga guud.
2) Qof kasta waxa uu xaq u leeyhay in uu ka soo jeediyo aragtidiisa meel fagaaro ah, warbaahin, ku qoro wargeys, ku daabaco buug ama ka soo saaro riwaayad ama filim ama warbaahinta elektroonikada ah.

3) Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay soo bandhigidda hal-abuur aan wax loogu dhimeyn, shaqsi, koox ama bulsho.
4) Xuquuqda qoraalka, hal-abuurka iyo hindisaha waa xuquuq gaar ahaaneed waxaa nidaaminaya xeer gaar ah.

Qodobka 25aad.

Xuquuqda Warbaahinta.

1) Qofkasta waxa uu xur u yahay in uu sameysto war-baahin gaar ah ama ka hadlo warbaahinta, lamana xadidi karo tiradooda iyo hannaanka shaqadooda, iyadoo la raacayo si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka DGGM iyo JFS.
2) Qofna lama faragalinkaro xiriirkiisa warbaahineed iyo qoraaladiisa gaarka ah marka laga reebo xaaladaha Xeerku baneeyo baaritaankooda, dabagalkooda ama dhagaysigooda, marka taas lagu tilaabsanayo waa in uu jiraa amar garsoore oo sababaysan.
3) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay in uu helo macluumaadka ay Dawladdu hayso.
4) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay helitaanka macluumaadka ay cid kale hayso oo loogu baahan yahay in lagu fuliyo ama lagu ilaaliyo xuquuq kastoo kale oo daw loo leeyahay.
5) Golaha Xeer-dejinta DGGM waa in uu soo saaraa Xeer lagu hirgelinayo xaqa macluumaad helidda.

Qodobka 26aad.

Hantida Gaarka ah.

1) Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho hanti u gaar ah, isticmaalo, ku raaxeysto, iska gado ama wareejiyo si waafaqsan Dastuurka JFS, Qodobkiisa 26aad.
2) Hase yeeshee:
    a) DGGM waxa ay la wareegi kartaa hanti gaar ah, haddii ujeedadu tahay danta guud ee DGGM iyo JFS.

b) Qofkasta oo hantidiisa ay la wareegto DGGM ama JFS iyadoo la raacayo danta guud waa in uu helaa magdhow caaddil ah oo lagu heshiiyay ama ay maxkamadi go'aamisay.

3) Wixii hanti guud ah oo ay lahaayeen dowladihii hore waxay hoos imaanayaan gacanta maamulka DGGM. Xeer gaar ah ayaa nidaaminaya hantida ay iska kaashadaan DGGM iyo jaaliyadaha, shirkadaha ama hay'adaha gaarka ah.
4) DGGM waxay dhiirigalinaysaa suuqa xurta ah iyo maalgalin shisheeye.

Qodobka 27aad.

Deegaanka (Bii'ada).

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay deegaan nadiif ah oo aan waxba u dhimaynin caafimaadkiisa iyo in laga ilaaliyo deegaanka wasaqaysan.
2) Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu qeybtiisa ka helo kheyraadka DGGM, islamarkaana lagu xadgudbin lana khasaarinin kheyraadka deegaanka.
3) DGGM waxa ay soo saareysaa nidaam Xeer ee lagu dhowrayo deegaanka kaas oo aan ka horimaankarin Xeerka deegaanka ee JFS.
4) Aafooyinka dhaca sida abaaraha, duufaanada, cudurrada faafa, iyo dagaalada waxay DGGM ka yeelanaysaa ku-talagal iyo u diyaargarow hore.

Qodobka 28aad.

Xoriyadda Sameynta Urur Bulsho iyo ka Qeybgal Banaabax.

1) Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu abuuro urur bulsho ama uu xubin ka noqdo, si waafaqsan Xeerka.
2) Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo kulan, kana qeybgalo, umana baahna oggolaasho xukuumadeed sida ku cad qodobka 20aad ee Dastuurka JFS.
3) Qof kastaa waxa uu xaq u leeyahay in uu abaabulo ama ka qeyb qaato bannaanbax nabadeed.

4) Qofna laguma qasbi karo inuu ku biiro ama ku jiro ururo nooc kasta ah, laakiin waxaa ka mamnuuca ku jirista, ka shaqaynta iyo la shaqaynta ururada xag-jirka ah kuwaas oo dhaqdhaqaaqooda laga mamnuucay DGGM.
5) Lama abuuri karo urur leh qaab ciidan ama argagixiso.

Qodobka 29aad.

Xaqa Ka Qeybgalka Siyaasadda iyo Doorashada

1) Muwaadin kasta wuxa uu xaq u leeyahay in uu ka qaybgalo hawlaha siyaasadeed heer dowlada DGGM ama heer JFS, ayadoo xaqa siyaasadda muwaadinka aan la xadeyn karin lana laali karin.
2) Muwaadin kastaa waxa uu furan karaa xisbi siyaasadeed ama waxuu xubin ka noqon karaa isagoo raacaya Xeerarka DGGM iyo JFS.
3) Muwaadin kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu wax doorto lana doorto si waafaqsan Xeerarka doorashooyinka ee heerarka DGGM iyo JFS.
4) DGGM, waxa ay soo saareysaa Xeerka xisbiyada siyaasadda iyo Xeerka doorashada ee heer DGGM.

Qodobka 30aad.

Fasiraadda, Xaddidaadda Xuquuqda Aadanaha iyo Saxidda Tacaddiyada.

Fasiraadda iyo xaddidaadda xuquuqda aadanaha iyo saxidda ku xadgudubyada xuquuqda aadanaha waxaa loo marayaa sida ku xusan Qodobada 38, 39 iyo 40 ee Dastuurka JFS.

Qodobka 31aad.

Waajibaadka Muwaadinka.

1) Waxaa waajib ku ah muwaadinka ku nool DGGM ilaalinta midnimada ummadda, Dastuurka iyo Xeerarka DGGM iyo kuwa JFS, ka qeyb qaadashada xasilinta ammaanka, iyo xoojinta nabad-ku-wada-noolaashaha iyo horumarinta dhaqaalaha DGGM.
2) Muwaadinka waxaa waajib ku ah bixinta **taakulada** DGGM iyo JFS.

3) Muwaadinka waxaa waajib ku ah difaaca dalka, diinta iyo dadka iyo bixinta tabarucaadka looga baahdo.
4) Qof kasta waxaa waajib ka saaran yahay daryeelka, ilaalinta iyo badbaadada deegaanka.

Cutubka Saddaxaad.

Qaab-dhismeedka Dowlad Goboleedka Galmudug (DGGM).

Qodobka 32aad.

Fidinta Awoodda Maamul ee DGGM.

1) Awoodda maamul ee DGGM waxaa lagu baahinayaa gobolada, degmooyinka iyo tuuloyinka; waxaa jiraya Goleyaasha Xeer-dejinta iyo Xukuumadda DGGM iyo maamulo laga soo doorto golayaasha heer gobol iyo heer degmo oo markooda soo dooranaya Guddomiyeyaasha heer gobol iyo heer degmo.
2) Heer kasta ee deegaan waxa uu yeelanayaaa maamul ku imaanaya doorasho ku saleysan nidaam axsaab badan, ayadoo uu shacabku soo dooranayo wakiilo matala oo lagu soo doorto si xor ah, xalaalna ah iyo codeyn qarsoodi ah.
3) Gobolku waxa uu ka koobmaa heer gobol, degmooyin, tuulooyin iyo daabiyado, ayadoo awoodda ismaamulidda la gaarsiinayo heer ay daabiyadda soo doorato wakiiladeeda matalaya.
4) DGGM, waxaa laga hirgalinayaa nidaamka dimuqraadiga ee axsaabta badan oo lagu dooranayo hoggaaminta DGGM, Gudoomiyaha Gobolka, Golaha Fulinta Gobollada, Golaha Fulint Degmada iyo Dowladaha Hoose.
5) Nidaamka iyo Xeerarka maamullada Gobollada iyo degmooyinka waxaa lagu dhisayaa oo lagu soo saarayaa Xeer gaar ah.

Qodobka 33aad.

Golaha Xeer-dejinta.

1) Golaha Xeer-dejinta DGGM ayaa masuul ka ah Xeer-dejinta DGGM, awooddiisa xileedna waa Xeer-dejin iyo kormeeridda xukuumadda.

2) Golaha Xeer-dejintu waxa uu ka kooban yahay lixdan iyo shan (65) Xildhibaan oo ay soo dooranayaan shacabka DGGM.

Qodobka 34aad.

Shuruudaha ka Mid-noqoshada Golaha Xeer-dejinta.

Xildhibaannimada Golaha Xeer-dejinta ee DGGM waxaa loo dooran karaa muwaadin kasta ee buuxiyay shuruudaha doorashada soo socda:

1) In uu muslim yahay, kuna dhaqmo Mad-habka Shaaficiyada;
2) In da'diisu ka yareyn labaatan iyo shan (25) sano kana weyneyn toddobaatan iyo shan (75) sano;
3) In uu maskax iyo jir ahaan caafimaad qabo si uu u guto xilkiisa;
4) In uu yahay Soomaali deggan deegaannada Galmudug, u dhashay ama ku dhaqmay lehna xuquuqda codaynta;
5) In aan Maxkamad awood u leh aysan si kama dambays ah ugu xukumin ciqaab gaareysa hal sano oo xabsi ah; iyo
6) In aaney aqoontiisu ka yareyn heer dugsi sare ama aqoon iyo waayaaragnimo u dhiganta.

Qodobka 35aad.

Luminta Xildhibaanimada Golaha Xeer-dejinta.

Xildhibaanku waxa uu xilkiisa ku weyn karaa xaaladaha soo socdo:

1) Haddii uu iska casilo xilka xildhibaannimada;
2) Haddii uu geeriyoodo;
3) Haddii uu beelo maskaxda ama xanuun aan lala shaqeyn karin uu ku yimaado taas oo uu caddeeyay dhaqtar;
4) Haddii xildhibaanku ka maqnaado/maqnaato laba kalfadhi ee Golaha shacabka oo caadi ah iskuna xiga sabab la’aan.
5) Haddii ay Maxkamadda awoodda u leh ay ku cadayso argagixisanimo ama uu la’yeesho xiriir.

6) Waxaa kale oo lagu lumin karaa sababaha kale ee uu tilmaamo xeer hoosaadka Golaha Xeer-dejinta DGGM.

Qodobka 36aad

Buuxinta Kuraasta Golaha Xeer-dejinta Bannaanaata

Haddii xubin ka mid ah Golaha Xeer-dejinta ay lumiso xildhibaanimadeeda waxaa baddelkeeda lagu soo dooranayaa sidii uu ku yimid xildhibaankii hore.

Qodobka 37aad

Mudada Golaha Xeer-dejinta

1) Muddo xileedka Golaha Xeer-dejintu waa afar (4) sano oo ka bilaabata marka lagu dhawaaqo natiijada doorashada, lana dhaariyo Xildhibaanada.
2) Fadhiga kowaad ee Golaha waa in lagu qabto afar iyo toban (14) casho gudahooda kaddib ku dhawaaqidda natiijada doorashada.
3) Muddo xileedka Golaha Xeer-dejinta lama kordhin karo sabab maangal ah la'aanteed.
4) Madaxweynaha ayaa ku dhawaaqaya doorashada Golaha cusub bil ka hor dhammaadka muddada Golahii hore.

Qodobka 38aad.

Awoodaha iyo Waajibaadka Golaha Xeer-dejinta.

Golaha Xeer-dejinta xilkooda waajibaad waa:

1) Diyaarinta, ka-doodista iyo ansaxinta xeerarka DGGM.
2) Wax-ka-beddelidda Dastuurka DGGM marka laga reebo Qodobada kuxusan Cutubada Kowaad iyo Labaad.

3) Doorashada iyo xil-ka-qaadidda Guddoonka Golaha Xeer-dejinta.
4) Doorashada iyo xil-ka-qaadidda Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.
5) U codeynta guddiyada joogtada ah iyo kala laabashada kalsoonida.
6) Ansixinta barnaamijka iyo xukuumadda uu soo magacaabay Madaxweynahu taasoo ku imaaneysa cod hal-dheeri ah.
7) Ka doodista iyo ansixinta miisaaniyadda sanadka iyo meelmarinta xisaab-xir sannadeedka;
8) Ansaxinta ama laalidda xaalad deg-deg ah oo ay xukuumaddu soo jeedisay;
9) Ka doodista iyo ansaxinta hindiso Xeeryeedyada xukuumaddu soo qaddinto;
10) Ka doodista iyo ansaxinta soo jeedin eedeyn Golaha laga keeno Guddoonka Golaha Xeer-dejinta iyo Madaxweynaha DGGM iyo Ku-xigeenkiisa;
11) U codeynta ama diidmada ansaxinta dhismo deegaano cusub;
12) U codeynta ama diidmada haya'adaha dowladda iyo guddiyada madaxabanaan;
13) La xisaabtanka xukuumadda, kormeeridda, baarista iyo wax-weydiinta hay'adaha Dowladda iyo guddiyada madaxabanaan;
14) Ansixinta heshiisyada DGGM u keenaya masuuliyad maaliyadeed, ayadoo xeer gaar ah nidaaminayo caddadka lacagta aan u baahnayn ansixinta Golaha Xeeridejinta.
15) Golaha Xeer-dejintu waxa uu amri karaa in baaris lagu sameeyo hay'ad dawladeed iyadoo waajibaadkaas u xilsaaraysa guddi xildhibaanno oo khibrad u leh howlaha la baarayo.
16) Xildhibaan kasta oo ka mid ah Golaha Xeer-dejinta DGGM marka ay xilkeeda gudanayso waa in ay ku shaqaysaa sida ay danta DGGM ku jirto.

Qodobka 39aad.

Faafinta iyo Xafidaadda Xeerarka.

Kaydinta Xeerarka DGGM waxaa mas'uul ka ah Xoghayaha Golaha Xeer-dejinta DGGM iyo Garyaqaanka Guud ee DGGM oo Faafinta Rasmiga ah ku samaynaya.

Qodobka 40aad.

Dhaqangelidda Xeerarka.

1) Hindise Xeer qabyo ah wuxuu dhaqan-gelayaa kaddib marka uu maro habraaca Xeer-dejinta, Madaxweynaha DGGM uu saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga.
2) Haddii Golaha Xeer-dejinta DGGM diido hindise Xeer, hindisehaasi laguma soo celinkaro Golaha muddo soddon (30) malmood laga bilaabo maalinta hindisaha la diiday.

Qodobka 41aad

Durid Xeer

1) Xeer maray habraaca ansixinta xeerarka iyo dhaqangeliddaba waxaa lagu duri karaa oo keliya inuu ka soo horjeedo Dastuurka DGGM.
2) Xeer maray shuruudaha ku xusan Qodobadaan waxaa duri kara:
   1. Saddax meelood meel (1/3) ka mid ah Xildhibaannada Golaha Xeer-dejinta DGGM.
   2. Golaha Wasiirrada DGGM;
   3. Ugu yaraan laba kun (2,000) oo cod bixiye diiwaangashan.
3) Duridda xeer si waafaqsan Faqradaha 1aad iyo 2aad ee Qodobkan waxaa la horgeyn karaa go'aanna ka gaari karta Maxkamadda Sare ee DGGM.
4) Haddii Maxkamadda Sare ee DGGM ay jebiso duriddii xeerka, kharashka ku baxay waxaa bixinaaya dhinacii hindisaha duridda Maxkammadda horkeenay.
5) Habraaca loo marayo duridda iyo go'aan-ka-gaarista waxaa lagu qeexayaa nidaamka garsoorka ee DGGM.

Qodobka 42aad.

Guddiyada Golaha Xeer-dejinta.

1) Golaha Xeer-dejinta waxa uu yeelanayaa guddi hoosaadyo wada howlaha Golaha Xeer-dejinta.

2) Guddiyada tiradooda iyo habka xulistooda iyo nidaamkooda shaqada waxaa lagu qeexayaa xeer-hoosaadka Golaha Xeer-dejinta ee DGGM.

Qodobka 43aad

Guddiga Arrimaha Golaha.

1) Golaha Xeer-dejinta waxa uu yeelanayaa Guddiga Arrimaha Golaha oo xubnahiisu ka kooban yihiin Guddoomiyaha, Ku-xigeenadiisa iyo Guddoomiyaasha Guddiyada Joogtada ah.
2) Guddiyada Joogtada Golaha waxa ay ku sameysmayaan baahida shaqo ee Golaha.
3) Guddiyada Joogtada Golaha waxaa soo jeedinayo Guddoonka Golaha, waxaana codka kalsoonida loo weydiinayaa Golaha Xeer-dejinta DGGM.

Qodobka 44aad.

Kalfadhiyada Golaha Xeer-dejinta.

1) Golaha Xeer-dejinta xilkiisa waajibaad waxa uu ku gudanayaa kalfadhiyada Golaha.
2) Golaha Xeer-dejinta waxa uu isugu yimaaddaa kalfadhi caadi ah sanadkii labo mar oo min afar (4) bilood ah, iyo kalfadhi aan caadi aheyn.
3) Golaha Xeer-dejintu waxa uu sameysanayaa xeer-hoosaad uu ku guto xilkiisa, anshaxa xubnaha golaha, waqtiga fasaxyada, nidaamka maamul ee Golaha, soojeedinnada hindisayaasha xeer, soojeedinta habka codeynta iyo kalfadhiyada.
4) Kalfadhiyada Golaha Xeer-dejintu waxa uu ku ansaxayaa aqlabiyad hal dheeri ah (50+1) ee xubnaha Golaha.
5) Golaha Xeer-dejinta go'aanadooda waxay ku meelmarinayaan cod aqlabiyad hal dheeri ah (50+1) ee xubnaha fadhiya marka laga reebo

Qodobada fadhiyada ku saabsan kalsooni-siin ama kala-noqosho xukuumada iyo soojeedinada ku saabsan xaaladaha deg-degga ah.

6) Kalfadhiyada Golaha Xeer-dejinta waxaa looga yeerikaraa xubnaha xukuumada ayagoo warbixin looga dhageysanayo ama su'aalo loogu weydiinayo qorshaha miisaaniyadda xukuumada ama hindise Xeer.
7) Kalfadhiyada Golaha Xeer-dejinta waxay u furanyihiin warbaahinta iyo dadweynaha haddii aan Gudoonka Goluhu hakin sababo jira awgeed.
8) Kalfadhi aan caadi aheyn waxaa isugu yeeri kara Gudoomiyaha Golaha Xeer-dejinta marka:
    a. uu dalbado Madaxweynaha; ama
    b. ay codsi qoraal ah ku soo gudbiyaan saddex meelood meel (1/3) ee Golaha Xeer-dejinta.

Qodobka 45aad.

Xasaanadda Xildhibaanka Golaha Xeer-dejinta.

1) Haddii aan laga haysan oggolaansho Golaha Xeer-dejinta, Xildhibaanka laguma qaadi karo dacwad ciqaabeed; lama xiri karo lamana baari karo qof ahaan, hoygiisa ama meeshii kale ee u gaar ah, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi Xeer ahaan khasab ay tahay in laga soo saaro amar qabasho ah. Sidoo kale haddii aan laga helin oggolaansho Golaha Xeer-dejinta lama qaban karo, xabsina laguma hayn karo iyadoo la fulinaayo xukun maxkamadeed oo xataa kama dambays ah.
2) Xildhibaanka Golaha Xeer-dejinta looma dabagali karo fikir ama codka uu ka hordhiibto Golaha Xeer-dejinta;
3) Xildhibaanka dacwad fal-dambiyeed laguma oogi karo illaa laga qaado xasaanadda xildhibaannimo, haddaan lagu qaban isagoo faraha kula jira dembi Xeer ahaan ay khasabtahay qabashadiisu.
4) Xildhibaanka waa lagu oogi karaa dacwad madani ah.
5) Xildhibaanka laga qaado xasaanaddiisa ee lagu oogay dacwad ciqaabeed laguna waayo, waxaa uu yeelanayaa magdhaw u qalanta sharafta laga qaaday iyo in uu Xildhibaanimadiisa sii wato.

6) Xildhibaanka si-kama-dambeys ah lagu xukumo dambi ciqaab waxa uu weynayaa xilka xildhibaannimada, isla maalinta xukunka kama-dambaysta ah uu dhaco.

Qodobka 46aad

Dhaarta

Xildhibaanada, Madaxweynaha, Madaxweyne kuxigeenka iyo Xubnaha Xukuumadda waxaa lagu dhaarinayaa Kitaabka Quraanka Kariimka ah, isagoo dhahayo, “waxaan ku dhaaranayaa magaca Ilaahey in aan xilkeyga u gudanayo si daacad ah oo danta diinta, dadka iyo dalka ku jirto, dhowrayana dastuurka DGGM iyo kan Qaranka iyo shuruucaha kale ee dalka”.

Waxaana dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee DGGM.

Qodobka 47-aad.

Qaabka loo Dooranayo Guddoonka Golaha Xeer-dejinta.

1) Golaha Xeer-dejintu wuxuu iska dhexdooranayaa Xildhibaanka ugu da’da weyn oo si ku meel gaar ah shir gudoominaya doorashada Gudoomiyaha iyo Ku-xigeennadiisa.
2) Gudoomiyaha iyo Ku-xigeennadiisa waxaa cod qarsoodi aqlabiyad ah ku dooranaya xubnaha Golaha Xeer-dejinta.
3) Ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee Golaha Xeer-dejinta DGGM waa inay joogaan u codaynta doorashada Guddoonka DGGM.
4) Doorashada Gudoomiyaha Golaha Xeer-dejinta waxaa la raacayaa hannaanka soo socda:
    a. Golaha Xeer-dejinta DGGM waxay Guddoomiye u dooranayaan murashaxa ku guuleysta aqlabiyad seddax meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta DGGM.
    b. Haddii murashax ku guuleeysan waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa saddaxda murashax ee ugu cod badan waxaana

ku guleeysanayaa Guddoomiyanimada Golaha Xeer-dejinta DGGM murashaxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba (2/3) codadka tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta DGGM.

c. Haddii murashaxna ku guleeysan waayo codbixinta wareegga laabad waxaa codbixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada murashax ee ugu cod badan waxaana Guddoomiyanimada Golaha Xeer-dejinta DGGM ku guuleysanaaya murashaxa hela cod haldheeri (50+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta.

5) Habraaca doorashada Gudoomiye Ku-xigeenka koowaad iyo kan labaad waxaa loo marayaa mid la mid ah doorashada Gudoomiyaha Golaha Xeer-dejinta.
6) Musharixiinta Gudoomiyaha iyo Ku-xigeennadiisa waxay ka imaanayaan xubnaha Golaha Xeer-dejinta.

Qodobka 48aad.

Kala-dirista Golaha Xeer-dejinta.

Golaha Xeer-dejinta waxaa la kala dirikaraa oo kaliya marka uu dhamaado muddada xilka ee afarta (4) sano.

Qodobka 49aad.

Waajibaadka Guddoonka Golaha Xeer-dejinta DGGM.

1) Golaha Xeer-dejinta DGGM waxa uu yeelanayaa Guddoomiye iyo Guddoomiye Ku-xigeenno noqonaya Guddoonka Golaha Xeer-dejinta.
2) Xilka Gudoomiyaha Golaha Xeer-dejinta waa:
    a) Waxa uu guddoomiyaa fadhiyada Golaha Xeer-dejinta;
    b) Waxa uu u qeybiyaa doodda xubnaha Golaha Xeer-dejinta;
    c) Waxa uu ilaaliyaa habsami u socodka shirarka iyo ku dhaqanka Dastuurka iyo Xeer-hoosaadyada Golaha Xeer-dejinta;
    d) Waxa uu guddoomaa soona hordhigaa mooshinnada ay soo jeediyaan xubnaha Golaha Xeer-dejinta si waafaqsan Dastuurka iyo Xeer Hoosaadyada Golaha;

e) Waxa uu ku dhawaaqaa natiijada ka soo baxda codeynta Golaha Xeer-dejinta;
f) Waxa uu sii hayaa xilka Madaxweynaha xilliga ay dalka ka maqanyihiin Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka;

3) Marka uu Guddoomiyaha Golaha ka maqanyahay kal-fadhiga ama dalka, waxaa xilkiisa qabanaya Guddoomiye Ku-xigeenka Kowaad; iyo
4) Haddii Guddoomiyaha iyo Ku-xigeenka Kowaad ka maqanyihiin kal-fadhiga ama dalka, waxaa xilka gudanaya Gudoomiye Ku-xigeenka Labaad.

Qodobka 50aad.

Xil Ka-qaadista Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta iyo Ku-xigeenadiisa

1) Golaha Xeer-dejinta waxa uu soojeedin karaa xil ka-qaadista Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta marka uu ku sifoobo in uu ku xadgudbo Dastuurka iyo Xeerarka DGGM.
2) Mooshinka laga keeno Guddoomiyaha waa in ay soo gubiyaan saddax meelood meel (1/3) ee tirada guud ee Golaha Xeer-dejinta.
3) Guddoomiyaha waxaa xilka looga qaadikaraa cod hal dheeri ah (50% +1) tirad guud ee Golaha Xeer-dejinta.
4) Ku-xigeennada Guddoomiyaha Golaha Xeer-dejinta waxaa xilka looga qaadikaraa ayadoo la raacayo sida ku xusan Faqradaha (1, 2 & 3) ee isla Qodobkaan.

Qodobka 51aad.

Qaab-dhismeedka Golaha Fulinta.

A. Hanaanka DGGM waxa uu noqonayaa hanaan Madaxtooyo oo Baarlamanteeri ah.
B. Golaha Xukuumaddu waa wadajirka Madaxweynaha iyo Madaxweye ku-xigeen, Wasiiro, Wasiir-ku-xigeeno iyo Wasiiru-dowloyaasha DGGM.

Qodobka 52aad.

Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka DGGM.

DGGM waxay yeelanaysaa Madaxweyne iyo Ku-xigeen la soo doorto ayadoo doorashada Madaxweynaha la hormarinayo.

Qodobka 53aad.

Shuruudaha Musharaxa Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka.

Waxaa xilalka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa ee DGGM isu soo sharixi kara muwaadin kasta oo buuxiya shuruudahan:

1) Muwaadin Soomaali ah, marwadiisuna tahay Muslim, kana soo jeeda DGGM, ahna Muslim ku dhaqma Mad-habka Shaaficiyada;
2) Caafimaadkiisa uu taam yahay.
3) Da'diisu aanay ka yarayn afartan (40) sano kana badneyn toddobaatan iyo shan (75) sano.
4) In uu leeyahay aqoon aan ka yareyn heer Jaamacad iyo waayo-aragnimo hoggaamin iyo maamul khibradeed oo aan ka yareyn shan (5) sano.
5) In aan Maxkamad awood u leh aysan si kama dambays ah ugu xukumin ciqaab gaareysa hal sano oo xabsi ah;

Qodobka 54aad.

Qaabka Doorashada Madaxweynaha DGGM iyo Ku-xigeenkiisa.

1) Madaxweynaha DGGM waa in ay doortaan Golaha Xeer-dejinta DGGM.

2) Ugu yaraan saddex meelood labo (2/3) tirada guud ee Golaha Xeer-dejinta DGGM waa inay joogaan u codaynta doorashada Madaxweynaha DGGM.
3) Waa in ay murashaxnimadiisa u soo jeediyaan fadhiga Golaha Xeer-dejinta ugu yaraan toban (10) Xildhibaan Golaha Xeer-dejinta DGGM ah.
4) Musharax Madaxweyne kasta waa in uu musharaxnimadiisa gaarsiiyaa Golaha Xeer-dejinta DGGM, waana in uu barnamijkiisa doorashada u soo bandhigaa Golaha Xeer-dejinta DGGM, oo markaa kaddib dooranaya iyadoo la raacayo geeddi-socodkan:
    a. Codeynta doorashada Madaxweynaha DGGM waa qarsoodi;
    b. Golaha Xeer-dejinta DGGM waxay Madaxweyne u dooranayaan murashaxa ku guuleysta aqlabiyad seddax meelood laba (2/3) tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta DGGM.
    c. Haddii murashax ku guuleeysan waayo waxaa codayn labaad loo qaadayaa afarta murashax ee ugu cod badan waxaana ku guleeysanayaa Madaxweyninimada DGGM murashaxa hela aqlabiyad ah seddax meelood laba (2/3) codadka tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta DGGM.
    d. Haddii murashaxna ku guleeysan waayo codbixinta wareegga laabad waxaa codbixin wareeg seddaxaad loo qaadayaa labada murashax ee ugu cod badan waxaana Madaxweynennimada DGGM ku guuleysanaaya murashaxa hela cod haldheeri (50+1) ee tirada guud ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta.
5) Doorashada Madaxwayne Ku-xigeenga DGGM waxaa loo marayaa habraaca doorashada Madaxwaynaha DGGM.

Qodobka 55aad.

La Wareegidda Xilalka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.

1) Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa waxa ay xilka la wareegayaan marka la soo doorto, guddiga doorashooyinkuna ay ku dhawaaqaan natiijada rasmiga ah ee codeynta Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa lana mariyo dhaarta ku cad qodobka 48aad ayadoo Madaxweynaha iyo Ku-xigenkiisa uu dhaarinayo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

2) Madaxweynaha la doortay waxa uu xafiiska la wareegayaa toddoba (7) maalmood **g**udahooda kaddib marka xilka Madaxweynanimo loo dhaariyo.
3) Madaxweynaha iyo Ku-xigenkiisa waxaa loo sameeynayaa xaflad caleemo-saar xilliga dhaarta.

Qodobka 56aad.

Muddada Xilka Madaxweynaha.

1) Madaxweynuhu waxa uu xilka hayn karaa muddo afar (4) sano ah, mar kalena dib ayaa loo soo dooran karaa ayadoo laba xilli ka badan aan la soo dooran karin.
2) Madaxweynuhu xafiiskiisa iyo deegaanka DGGM kama maqnaan karo wax ka badan afartan iyo shan (45) maalmood oo isku xigta, wixii ka badan waxaa loo aqoonsanayaa xil gudasho la'aan joogta ah.

Qodobka 57aad.

Awoodaha iyo Waajibaadka Madaxweynaha DGGM.

Madaxweynaha DGGM:

1) a-Waa Hogaamiyaha DGGM b- madaxa Xukumadda DGGM.
2) Waa astaanta midnimada dadweynaha DGGM.
3) Waxa uu shir guddoominayaa fadhiyada Golaha Wasiirada.
4) Waxa uu soo dhisaa xukuumadda, magacaabaa wasiirada, xilkana ka qaadaa.
5) Waxa uu magacaabaa saraakiisha sare, xilkana ka qaadaa kaddib marka Golaha Wasiirada DGGM soojeediyaan.
6) Waxa uu saxiixaa heshiisyada lala galayo Dowlad Goboleedyada ka midka ah JFS, iyo Dowaladda dhexe ee JFS.
7) Waa Taliyaha Guud ee Ciidamada Nabad-gelyada ee DGGM.
8) Waxa uu fidiyaa saamaxaad iyo cafis, markii uu helo talo-soo-jeedinta hay'adaha garsoorka.
9) Waxa uu u xilsaaran yahay ilaalinta Dastuurka iyo Xeerarka DGGM iyo JFS.

10) Waxa uu metelaa DGGM iyo shacabka deegaanka.
11) Waxa uu bixiyaa billad-sharaf iyo abaalmarin heer DGGM.
12) Waxa uu saxiixaa Xeerarka uu ansixiyo Golaha Xeer-dejinta DGGM.

Qodobka 58aad.

Luminta Xilka Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.

1) Madaxweynuhu waxa uu xilkiisa weynayaa marka:
    a. Uu geeriyoodo;
    b. Uu caafimaad ahaan xilkiisa u gudankari waayo taas oo uu caddeeyay dhaqtar;
    c. Uu xilka iska casilo; iyo
    d. In xilka laga qaado.
2) Madaxweyne Ku-xigeenka waxuu xilka ku weyn karaa sida ku xusan Faqradda kowaad ee Qodobkaan.

Qodobka 59aad.

Xil Ka-qaadista Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.

1) Golaha Xeer-dejinta waxa uu soojeedin karaa xil ka-qaadista Madaxweynaha marka uu ku sifoobo in uu ku xadgudbo Dastuurka iyo Xeerarka DGGM.
2) Mooshinka laga keeno Madaxweynaha waa in ay soo gubiyaan saddax meelood meel (1/3) ee tirada guud ee Golaha Xeer-dejinta.
3) Madaxweynaha waxaa xilka looga qaadikaraa cod saddex meelood labo (2/3) tirad guud ee Golaha Xeer-dejinta.
4) Madaxweyne Ku-xigeenka waxaa xilka looga qaadayaa karaa cods hal dheeri ah (50 +1)

Qodobka 60aad.

Sii-haynta Xilka Madaxtooyada.

Xilka Madaxtooyada sida loo sii haynayo:

1) Haddii uu Madaxweynaha maqanyahay waxaa sii haynaya xilka Madaxweyne Ku-xigeenka;
2) Haddii Madaxweynaha iyo Ku-xigeeniisu maqanyihiin waxaa sii haynaaya xilka Gudoomiyha Golaha Xeer-dejinta.
3) Haddii Gudoomiyaha Golaha Xeer-dejinta maqanyhay waxaa sii haynaya xilka Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha Xeer-dejinta.
4) Madaxda kor lagu xusay hal mar kama wada maqnaankaraan degaanka DGGM.

Qodobka 61aad.

Xilka Madaxweyne Ku-xigeenka.

1) Waa kaaliyaha Madaxweynaha.
2) Xilka xafiiska Madaxweyne ayuu qabtaa marka Madaxweynuhu ka maqanyahay dalka.
3) Marka Madaxweynaha ka maqanyahay DGGM uuna joogo dalka waxa uu xilka qabanayaa haddii Madaxweynha qoraal ugu idmo.
4) Madaxweyne Ku-xigeenka xilka kula wareegay sida ku cad Qodobka 55aad Faqrada (2) labaad, waxa uu xilka si rasmi ah u heynayaa ilaa laga gaarayo xilliga doorashada.
5) Madaxweyne ku-xigeenka waxa uu xilka hayn karaa mudo afar (4) sano ah, markalena dib waa loo soo dooran karaa, laba xilli kabadana lama soo dooran karo.

Qodobka 62AAD.

Habka Buuxinta Jagada Bannaanaata ee Madaxweynaha iyo Ku-xigeenkiisa.

1) Haddii mid ka mid ah xaaladaha ku xusan Qodobka 59aad ay ku timaado Madaxweynaha waxaa si ku-meel-gaar ah xilka Madaxweynaha u qabanaya Madaxweyne Ku-xigeenka oo muddo soddon (30) maalmood ah ku qabanaya doorashada Madaxweynaha.

2) Muddo xileedka Madaxweynaha lagu soo doortay ayada oo la raacayo Faqradda (1) ee isla Qodobkaan waxuu xilka haynayaa muddada ka harsan muddo xileedkii Madaxweynahii jagada banneeyay.
3) Waxaa la raacayaa Faqradda (2) ee isla Qodobkaan haddii Madaxweyne Ku-xigeenku xilka banneeyo.

Qodobka 63aad.

Golaha Wasiirada.

1) Golaha Wasiirada waxaa soo magacaaba Madaxweynaha DGGM.
2) Golaha Wasiirada ee uu soo magacabay Madaxweynaha waxaa codka kalsoonida ku ansaxinaaya Golaha Xeer-dejinta si aqlabiyad hal dheeri ah.
3) Soo magacaabida iyo ansaxintooda waa in aysan dhaafin afartan iyo shan (45) maalmood marka xafiisaka uu la wareego Madaxweynahu.
4) Golaha Wasiirada waxaa laga soo magacaabikaraa xubnaha Golaha Xeer-dejinta iyo banaankaba.

Qodobka 64aad.

Shuruudaha Ka Mid Noqoshada Golaha Wasiirada.

Shuruudaha laga doonayo xubinta Golaha Wasiirada waa inuu:

1) Yahay Muwaadin Soomaali ah, kana soo jeeda DGGM, ahna Muslim Sunni ah kuna dhaqma Mad-habka Shaaficiyada;
2) Leeyahay aqoon waxbarasho heer jamacadeed ama waayo-aragnimo u dhiganta;
3) Leeyahay ugu yaraan xirfad maamul oo gaarsiisan illaa shan (5) sano;
4) Da’diisu ka yareyn soddon (30) sano.
5) In aan Maxkamad awood u leh aysan si kama dambays ah ugu xukumin ciqaab gaareysa hal sano oo xabsi ah;

Qodobka 65aad.

Xilka iyo Waajibaadka Golaha Wasiirada.

1) Golaha Wasiirada waxa ay ka masuulyihiin:
    a) Fulinta siyaasadaha guud ee DGGM.
    b) Horumarinta dhaqaalaha, arrimaha bulshada, nabadgelyada iyo xasiloonida guud ee DGGM.
    c) Dejinta qorshaha guud ee lagu hormarinayo DGGM.
    d) Dejinta siyaasad maaliyadeed, iyo maalgelinta deegaanka iyo kobcinta dhaqaalaha.
    e) Dejinta miisaaniyad sanadeedka iyo xisaab-xirka sanadka.
    f) Dejinta hindise Xeer iyo soo hor-dhigidda Golaha Xeer-dejinta
    g) Diyaarinta iyo ansaxinta xeerarka maamulka, iyo soo-jeedinta magacaabidda iyo xil-ka-qaadida saraakiisha sare ee DGGM.
    h) Xiriirinta DGGM iyo maamullada gobollada iyo degmooyinka DGGM iyo xiriirka DGGM la leedahay Dowladda Federaalka iyo dowlad-goboleedyada kale.
2) Nidaamka xiriirka iyo wada-shaqeynta ku xusan Faqradda 1aad (h) ee Qodobkaan waxaa lagu cadeynayaa xeerar gaar ah.

Qodobka 66aad.

Golaha Guurtida.

1) DGGM waxuu yeelanayaa Gole Guurti.
2) Golaha Guurtida DGGM oo ah Golaha Odayaasha dhaqanka, waa hay'adda ugu sareysa arimaha dhaqanka, waxaana lagu maamulayaa xeerar ka soo baxa Golaha Xeer-dejinta DGGM.
3) Golaha Guurtidu waxa uu u xilsaaranyahay xallinta khilaafaadka beelaha iyo arimaha dhaqanka.
4) Xarunta Golaha Guurtidu waa magaalo madaxda maamul Gobaleedka Galmudug ee Dhuusamareeb.
5) Astaanta Goluhu waa laba (2) bokoor & koofi dulsaaran.
6) Golaha Guurtida waxa ay wada shaqayn la leeyihiin Wasaaradda Arimaha Gudaha ee DGGM.

Qodobka 67aad.

Shuruudaha Ka Mid Noqoshada Golaha Guurtida.

Qofka ka mid noqonaya Golaha Guurtida waa in uu yeesho shuruudaha hoos ku xusan:

a. In uu Muslim yahay, kuna dhaqmo mad-habka Shaaficiyada.
b. In uu yahay madax dhaqameed soo jireen ah oo la aqoonsanyahay.
c. In uu caafimaad ahaan, jir ahaan iyo caqli ahaanba u gudan karo xilkiisa.
d. In uu yahay qof diinta aqoon fiican u leh oo dhaqanyaqaan ah.
e. Inaanu hore ugu dhicin xukun ciqaabeed oo kama dambays ah, oo maxkamadda awood u leh horteeda kaga caddaatay.
f. Inuu yahay xilkas, akhlaaqdiisa iyo dhaqankiisuna suuban yihiin.
g. Uma bannaana qof shaqaale dawladeed ah ka mid noqoshadda Golaha Guurtida.
h. Haddii ay baneyso xubin ka mid ah golaha guurtida xubinnimadeeda waxaa soo buuxsanaya xubintaas beeshuu madax-dhaqmeedkaasi ka soo jeedo.

Qodobka 68aad.

Tirada Golaha Guurtida.

Tirada Xubnaha Golahha Guurtidu waa labaatan iyo shan (25) oo iska dhex dooranaya Guddoomiye iyo Guddoomiye-ku-xigeen iyo guddi hoosaadyo inta uu u baahdo.

Qodobka 69aad

Fadhiga ugu Horeeya ee Golaha Guurtida

1. Fadhiga ugu horeeya ee Golaha Guurtidu wuxuu qabsoomayaa 15 (shan iyo toban) maalmood gudahood ka dib maalinta la soo dhamaystiro xulashadiisa, waxaana furaya oo dhaarinaya Guddoomiyaha Maxkamada Sare ee Maamul Gobaleedka

Galmudug, waxaana shirkaas guddoominaya xubinta ugu da'weyn inta laga dooranayo guddoomiye rasmi ah iyo ku xigeen.

2. Kal fadhigiisa ugu horreeya, Golaha Guurtida waxa uu ku ansixinayaa xeer hoosaadka Golaha.

Qodobka 70aad

Luminta Xubinnimada Golaha Guurtida

1. Xubinimada Golaha Guurtida waxaa lagu lumin karaa xaaladaha soo socdo:
    a. Haddii uu iska casilo xilka;
    b. Haddii uu geeriyoodo;
    c. Haddii uu beelo maskaxda ama xanuun aan lala shaqeyn karin uu ku yimaado taas oo uu caddeeyay dhaqtar;
    d. Haddii uu ka maqnaado laba kalfadhi ee Golaha Guurtida oo caadi ah iskuna xiga sabab la'aan.
    e. Haddii ay Maxkamadda awoodda u leh ay ku cadayso argagixisanimo ama uu la leeyahay xiriir.
2. Waxaa kale oo lagu lumin karaa sababaha kale ee uu tilmaamo xeer hoosaadka Golaha Guurtida DGGM.

Qodobka 71aad.

Awoodda Iyo Waajibadka Golaha Guurtida.

Waajibaadka Golaha Guurtidu waa sidaan:-

1. Ilaalinta dhaqanka suuban ee bulshada iyo dhawrista xeerarka la xiriira arimaha dhaqanka;
2. Xallinta khilaafaadka Beelaha iyo arimaha dib-u-heshiisiinta;
3. Doorashada Guddoomiyaha Golaha Guurtida iyo Ku-xigeenkiisa;
4. Dejinta Xeer-hoosaadka Golaha Guurtida iyo ansixintiisa;
5. U gudbinta Golaha Xukuumadda iyo Golaha Xeer-dajinta talooyin iyo tilmaamo ku saabsan hoggaaminta siyaasadda dhaqanka.

6. Soojeedinta xeerar ku saabsan dhaqanka, ka-talo-bixinta dhaliilaha maamul ee xukuumadda iyo ogeysiintooda Golaha Xeer-dajinta.
7. Ka-gacan-siinta xukuumadda arrimaha la xiriira diinta, nabadgelyada, difaaca, dhaqanka, dhaqaalaha iyo bulshada iyaga oo kaashanaya Wasaaradda Arimaha Gudaha.
8. Golaha Guurtidu waxa uu yeelanayaa Gudddi hoosaadyo, waxaana nidaamin doona xeer u gaar ah;
9. Waxa kale oo Goluha Guurtidu awood u leeyahay dhammaan awoodaha uu siiyay Dastuurka iyo xeerarka kale ee DGGM.

Qodobka 72-aad.

Golaha Culumada Diinta.

1. Waxaa jiraya golaha Culumada Diinta Islaamka ee DGGM.
2. Golahu wuxuu ka koobnaanayaa shan iyo labaatan (25) xubnood oo caan ku ah aqoonta Shareecada Islaamka.
3. Golaha waajibaadkiisu wuxuu noqonayaa in ay dowlada kala taliyaan arinkasta oo quseysa Shareecada Islamka.
4. Golahu waxuu caddeyn ka bixinayaa Masaa'isha Diiniga ah ee looga baahdo.
5. Golaha Xeer-dejinta ayaa soo saaraya Xeer gaar ah oo si faahfaahsan u nidaamiya awoodaha iyo waajibaadka Golaha Culumada Diinta ee DGGM.

Qodobka 73-aad.

Shuruudaha Xubinimada Golaha Culumada Diinta Islaamka.

Xubinta ka mid noqonaysa Golaha Culumada Diinta waa in:

1. Uu yahay caalim caabid ah.
2. Mad-habkiisuna yahay Shaaficiya (Ashcariya).
3. Uusan xiriir la yeelan argagaxisada qeybeheeda kala duwan.

Qodobka 74aad.

Garsoorka.

1. Garsoorku waa awood ka madax-bannaan hay'adaha Xeer-dejinta iyo Fulinta, wuxuuna hoostagaa Golaha Adeegga Garsoorka madaxabanaan ee DGGM.
2. Garsoorku waxuu dhaqangaliyaa Xeerarka JFS iyo kuwa DGGM.
3. Hay'adaha garsoorku waxa ay u madax-bannaanyihiin gudashada howlahooda waajibaad ee garsoor.

Qodobka 75aad.

Qaab-dhismeedka Garsoorka.

1. Garsoorka DGGM waxa uu u dhisanyahay habka heerarka kala sareynta garsoorka Maxkamadaha ee kale ah sida soo socota:
    a. Maxkamadda Sare, oo ah darajada ugu sareysa DGGM.
    b. Maxkamadaha Racfaanka ee darajada labaad ee Gobollada DGGM; gobol kastana waxa uu yeelanayaa Maxkamad Rafcaan.
    c. Maxkamadaha darjada koowaad oo ka kooban Maxkamadda Degmada iyo tan Gobolka.
2. Gudoomiyaha Maxkamada Sare:
    a. Waa Madaxa ugu sareeya hay'adaha Garsoorka;
    b. Wuxuu Shir-guddoomiyaa shirarka Guddiga Adeegga Garsoorka.
    c. Waxuu dabbaqaa Shareecada Islaamka iyo Dastuurka DGGM.
    d. Waxuu awood u leeyahay go'aan-ka-gaarista waxkasta oo qilaaf Dastuuri ah oo ka dhex dhaca Madaxda DGGM.
3. Golaha Xeer-dejinta ee DGGM ayaa soo saaraya xeerka garsoorka, oo ay ku qeexantahay ikhtisaasaadka maxkamadaha.

Qodobka 76aad.

Hawlaha Garsoorka.

Garsoorku waxa uu u xilsaaranyahay waajibaadkan:

1. U garqaadidda dhinacyada;
2. Dhegeysiga dacwadaha;
3. Dhaqangalinta Dastuurka DGGM iyo Dasturka JFS, iyo Xeerarka DGGM iyo kuwa qaranka iyo Qawaaniinta Caalamiga ah ee JFS aqoonsantahay.

Qodobka 77-aad.

Shuruudaha Xubnaha Garsoorka.

Qofka Garsoore noqonayaa waa in uu yahay:

a. Muslim suni ah kuna dhaqma mad-habka Shaaficiyada;
b. Da'diisu kayareyn soddon sano (30).
c. Shahaado ka haysto Kulliyadaha Shareecada iyo Qaanuunka ama aqoon durugsan u leh Shareecada Islaamka.
d. Leeyahay dhaqan wanaagsan iyo karti xilgudasho oo howshiisa la xariirta.

Cutubka Afarad.

Hay'adaha iyo Guddiyada Dowladda ee Madaxabannaan.

Qodobka 78aad.

Hay'adaha Dowladda ee Madaxabannaan.

a. Hay'adaha Dowladda ee Madaxabanaan ee DGGM waa:
    a) Xeer-ilaalinta Guud ee DGGM;
    b) Hanti-dhowrka Guud ee DGGM;
    c) Xisaabiyaha Guud ee DGGM;
    d) Gudiga Shaqaalahahaa Rayidka ee DGGM.
b. Awoodda, xilalka iyo waajibaadka hay'adaha dowladda ee kor ku xusan waxaa nidaaminaya Xeerar gaar ah.

Qodobka 79aad.

Guddiyada Madaxabanaan.

1. Guddiyada madaxabanaan ee DGGM waa hay'ado ka madaxbanaan xukuumadda oo aan xakameyn siyaasadeed iyo faragalin lagu sameyn karin, awoodna u leh in ay u adeegsadaan aqoon iyo xirfad howlaha loo idmaday.

2. Guddiyada madaxabanaan ee DGGM marka ay waajibaadkooda gudanayaan waa in ay u feejig-naadaan tixgalinta xuquuqda aadanaha, dimoqoraaddiyada, isla-xisaabtanka iyo daahfurnaanta.
3. Miisaaniyadda Guddiyada madaxabanaan ee DGGM waxay ka muuqanaysaa madax gooni u ah oo ku lifaaqan miisaaniyada DGGM;
4. Guddiyada madaxabanaan ee DGGM waxa ay kala yihiin:
    a. Guddiga Adeega Garsoorka;
    b. Guddiga La-dagaalanka Musuqmaasuqa;
    c. Guddiga Doorashooyinka;
    d. Guddiga Xuquuqda Aadanaha; iyo
    e. Guddiga Amniga.
5. Guddiyada madaxabannaan waxaa soo qaddimeysa Xukuumadda DGGM, waxaana codka kalsoonida siinaya Golaha Xeer-dejinta DGGM.
6. DGGM waxay ka soo saareysaa Xeerar qeexeya hannaanka loo dhisayo guddiyada kor ku xusan, awoodahooda iyo waajibaadkooda shaqo.
7. DGGM waa in ay guddiyada madaxabanaan ee dastuuriga ah ku dhistaa muddo 12 bilood gudahooda kaddib maalinta la ansaxiyo Xukuumadda.

CUTUBKA 5-AAD.

QODOBO QUBANE AH.

Qodobka 80-aad .

Dhaqaalaha DGGM.

1. Si loo xaqiijiyo kobcinta waxsoosaarka, kor-u-qaadidda heerka nolosha, abuuridda goobo shaqo, iyo guud ahaan horumarinta dhaqaalaha gobolka, DGGM waxuu dejinayaa siyaasadda guud ee dhaqaalaha, oo ku salaysan mabaadi'da suuqa xorta ah iyo is-garabsiga hantida gaar ahaaneed, hantida guud, hantida iyo maalgelinta shisheeyaha.
2. lyadoo la dhawrayo inaanu habka dhaqaalahu noqonin mid horseeda in barwaaqadu ku koobnaato ama ku ururto koox ama dad tiro yar, si aanay u dhalan dabaqado dhaqaale oo ka kooban kuwo wax haysta

iyo kuwo aan wax haysan, si aanay u balaaran farqiga dhaqaale ee u dhaxeeya reer magaalka iyo reer miyiga, wuxuu maamulku xaqiijinayaa in adeegyada bulsho iyo fursadaha dhaqaale si cadaalad iyo sinnaan ah loo qaybiyo.

3. Maalgelinta shisheeyaha ee dalka gudahiisa, waxaa nadaaminaya xeer gaar ah oo uu soo saaro Golaha Xeer-dejinta DGGM kaasoo damaanad-qaadaya.
4. Maamulku waa inuu dhiirigeliyaa, gacansiiyaa, suurtageliyaa maalgelinta shisheeyaha iyo kuwa wadaniga ah.
5. Wax soo saarayaasha yaryar iyo iskaashatooyinku waxay yeelanyaan mudnaan gaar ah.
6. Dowladu waxay ilaalinaysa awooda wax-gadashada dadweynaha gaar ahaan kuwa dan yarta ah.

Qodobka 81aad.

Ciidamada Nabadgelyada DGGM

a) DGGM waxa ay yeelaneysaa ciidamo nabadgalyo oo kala ah:
b) Booliska iyo daraawiish;
c) Nabad-sugidda;
d) Ciidanka Asluubta;
e) Xeer gaar ah ayaa laga soo saarayaa qaab-dhismeedka iyo waajibaadka ciidan kasta gudanayo.

Qodobka 82aad.

Xiriirka DGGM iyo JFS.

DGGM iyo Dawladda Federalka waxay ka wada-xaajoondoonaan awood qeybsiga labada dowlo iyo ku heshiinta qeybsiga kheyraadka dalka.

Qodobka 84aad:.

Dhaqangelinta Heshiiska Maamulladii DGGM iyo DGGD.

1) Heshiiskii Maamulladii DGGM iyo Dowlad Goboleedka Gobollada Dhexe (DGGD) ay ku midoobeen ee ka dhacay Muqdishu muddadii u

dhaxeysay 27 Nofember - 6 Disember 2017 waxuu qorayaa sida ku cad Lifaaqa B.

2) Ilaa la gaarayo xilliga doorasha dambe ee Golaha Xeer-dejinta iyo Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka DGGM, waxaa sí ku-meel-gaar ah loo laalay Qodobka 33aad (2), Qodobka 51aad (2) Qodobka 57aad (1 xarafkiisa b iyo 3) ee Dastuurka DGGM, wixii aan la socon karin Heshiiska labadii maamul ee midoobay.
3) Waxaa jiraya Madaxa xukuumadda DGGM xilliga kala-guurka oo xilkiisa kamid yahiin sida soo socota:
    a. Madaxa Xukuumadda DGGM.
    b. Horgeynta Golaha Xeer-dejinta xubnaha Golaha Wasiirrada iyo Barnaamijka Xukuumadiisa si ay u siiyaan kalsooni;

Cutubka 6aad.

Qodobada Xilliga Kalaguurka iyo Dhaqangalinta Dastuurka DGGM.

Qodobka 83aad .

Ansaxinta iyo Wax-ka-baddalka Dastuurka DGGM.

1) Golaha Xeer-dejinta ayaa awood u leh wax-ka-baddelka Dastuurka.
2) Wax-ka-baddalka Qodobada ku xusan Cutubyada Kowaad iyo Labaad, waxay u baahnayahiin afti dadweyne.
3) Wax-ka-baddalka Qodobada kale ee Dastuurka waxaa soo jeedin kara afar meelood meel Golaha Xeer-dejinta, waxaana lagu ansixinaya cod hal-dheeri ah (50%+1) ee xubnaha Golaha Xeer-dejinta ee DGGM, marka laga reebo qodobada ku xusan Xarafka (a) ee isla Qodobkaan.
4) Wax-ka-baddalka Qodobada Dastuurka ee Golaha Xeer-dejinta DGGM uu ku sameyo sida ku xusan isla Qodobkaan, waxaa loogu dhaqmayaa si-ku-meel-gaar ah inta Dastuurka afti dadweyne lagu ansaxinayo.
5) Wuxuu Madaxweynahu kala tashadaa magacaabidda iyo xilka qaadidda xubnaha Golaha Wasiirada.
6) Guddoominta fadhiyada golaha wasiirada.
7) Waxuu masuul ka yahay howlgalinta Golaha Wasiirada.
8) Waxuu warbixin ka siiyaa Madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeenka habsami u socodka howlaha Golaha Wasiirada.

9) Madaxa xukuumada waxaa xilka looga qaadi karaa cod hal dheeri ah (50+1) waxaana badalkiisa soo magacaabanaya ahlusuna waljamaaca.
10) Waxaa xilliga kala-guurka jiraya Gole Xeer-dejin oo xubnahiisu dhanyihiin labo boqol iyo kow (201) xildhibaan.
11) Muddada xilliga kala-guurku waa afar sano (4); oo ka bilaabata 26/03/2018; oo ah markii la isku daray labada baarlamaan.

Qodobka 85aad.

Dhaqangalka Dastuurka DGGM.

1) Golaha Xeer-dejinta DGGM fadhiga ugu horeeyo waa inuu ku soo saaro soojeedin (mowshin) lagu dhaqangalinayo Dastuurka DGGM, cod aqlabiyad ahana lagu ansaxiyo.
2) Dastuurkan wuxuu uu awood dhaqangal kama dambeys ah yeelanayaa marka afti dadweyne loo qaado cod aqlabiyad ahna loogu codeeyo.
3) Mudada hirgalinta aftida dadweynaha ma dhaafikarto saddax (3) sano.

LIFAAQA (A)



LIFAAQA (B)

Heshiiska maamullada Galmudug State (GMS) iyo MaamulkaAhlusuna Waljamaca (ASWJ) ee Muqdisho, 27 Nov - 6 December 2017

Wadatashi, falanqayn iyo kulamo gooni-gooni ah oo dhinac socday seminaarkii ku saabsanaa xallinta khilaafaadka iyo nabadaynta oo ay garwadeen ka ahayd Dowladda Federaalka Soomaaliya, Dawladda Djabouti iyo IGAD kaddib, waxaa la gaaray heshiis ay ku midoobeen labada maamul, waxaana lagu heshiiyey qodobada soo socda:

1. In Madaxwaynaha, Madaxwayne ku-xigeenka, Guddoomiyaha Barlamaanka iyo Labadiisa ku-xiggen ee Galmudug ay sii haynayaan xilka.
2. In magaca Galmudug iyo Calankaba loo daayo sida ay hadda yihiin.
3. In la siiyo Madaxweynaha Maamulka Gobollada Dhexe (ASWJ) awood maamul oo ah madaxa xukuumadda (Chief of Ministers), oo awoodihiisana ay kamid yihiin:
    a. Horgaynta Golaha Shacabka Wasiirrada, Wasiiru Dowleyaasha, Wasiir Ku Xigeennada marka Madaxwaynuhu soo magacaabo.
    b. Guddoominta fadhiyada Golaha Wasiirrada.
    c. Waxa uu la tashadaa Madaxwaynaha iyo Madaxwayne Ku Xigeenkiisa mar walba.
    d. Madaxwaynaha Dowlad Goboleedka ayaa magacaaba, xilkana ka qaada Wasiirada, Wasiiru Dowleyaasha, Wasiir Ku Xigeennada markuu la tashado Madaxwayne Ku Xigeenka iyo Madaxa Golaha Wasiirada (Chief of Ministers).
4. Waxaa lagu heshiiyay in laysku daro labada Baarlamaan oo hadda jira , ayadoo la raacayo awood qaybsiga beelaha.
5. In Golaha Wasiirada lagu qaybsado si heshiis lagu yahay oo ku salaysan habka awood qaybsiga iyada oo la raacayo awood qaybsiga beelaha.

1

6. In ASWJ ay soo magacaabato Gudoomiyaha Maxkamada Sare.
7. In la qaybsado Taliyeyaasha iyo Taliyaal Ku xigeenada ciidamada sida Daraawiishta, Nabadsugidda, Booliska iyo Ciidanka Asluubta iyada oo la raacayo awood qaybsiga beelaha.
8. In Gudooomiyeyaasha Degmooyinka ee hadda jira ay sidooda usii shaqeeyaan inta laga dhisayo maamul dhameystiran.
9. Waxaa la isla meel dhigay in la iswaafajiyo labada dastuur iyo labada astaan ee Maamullada Galmudug iyo Gobolada Dhexe ee ASWJ, si dan u ah maamulka dhismaya ayadoo loo saarayo guddi farsamo.
10. Waxaa lagu heshiiyay in la abuuro ciidan isku dhaf ah oo dawlad-goboleedku leeyahay inta ka horaysana ciidan walba oo hada jira uu meshiisa ama goobtiisa uu sii joogo.
11. Waxaa lagu heshiiyay qof lagu ogyahay inuu yahay argagaxiso ama la shaqeeya Argagisada ama Burcad badeed ah in uu san ka mid noqon karin maamuulka cusub ee dhismaya.
12. Wixii kaloo farsama ah ama ka dhiman heshiiskaan waxaa lagu dhamayn doonaa fadhiyo kale.
13. Deegaannada hoos yimaada mamulka ASWJ oo qaybta ka ah Gobolka Hiiraan waxaa looga hadli doonaa fadhi gaar ah si waafaqsan Dastuurka Qaranka.
14. Waxaa la isla gartay in heshiiska lagu dhammaystiro, laguna fuliyo magaalo madaxda mamulka cusub ee Dhuusamareeb sida ugu dhaqsaha badan.

Mahadcelin:

- Labada dhinac waxay u mahad celinayaan Dawlada Federalka Soomaliya hoggaankeeda sare oo waqti badan ku bixiyay ka gun gaarista heshiiskaan.
- Waxaa sidoo kale loo mahadcelinayaa Dawlada Jabuuti, shacab iyo Madaxwaynaba, Dowladaha Maraykanka iyo Ingiriiska, Ururka Midowga Afrika, Urur Goboleedka IGAD, Qaramada Midoobay, Midowga Yurub, Ururka Iskaahsiga Khaliijka, Norway iyo Hay'adda Somali Stability Fund.

Hershiiskaaan waxaa lagu horsaxiixay Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Galmudug State

Axmed Ducaale Geelle

Ahlusunna Waljamaca

Sh. Maxamed Shaakir Cali

Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib u heshiisiinta

Cabdi Faarax Saciid (Juxa)

(Markhaati)